

Ku saabsan BUP Stockholm

Cilmi nafsiga carruurta iyo dhalinyarada ee Stockholm, BUP, waa hawl gaar ah oo ka mid ah daryeelka caafimaadka dadweynaha oo ay wadaan gobolka Stockholm.

Waxaanu bixinaa taageero iyo daawaynta carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 17 sano ee u baahan daryeel maskaxeed oo gaar ah.

BUP Stockholm waxay abaabuleen dhowr xarumood oo deegaan/lookal ah oo ku yaala gobolka Stockholm kuwaas oo baaritaan ku sameeya oo daaweeya carruurta qabta noocyada kala duwan ee dhibaatooyinka dhinaca dhimirka. Waxaan sidoo kale ka shaqaynaa dhinacyada sida fidinta aqoonta, cilmi baarista iyo horumarka.

Ku soo dhawow inaad nala soo xiriirto

Ma waxaad tahay ilmo, dhalinyaro ama qof mas'uul ah oo waxaad rabtaa inaad nala soo xiriirto? wac markaas BUP:s "En väg in" lambarka 08-123 524 50. Kani waa lambarka taleefoonka ee ay tahay inaad isticmaasho xiriirka ugu horreeya. Waxaad naga heli kartaa maalmaha shaqada ee aan fasaxa ahayn laga bilaabo saacada 8.00-16.00.

Haka shakiyin inaad nala soo xiriirto. Waxaan samayn doonaa in aanu ku siino hagitaan iyo taageerada ugu wanaagsa.

Miyaad u baahan tahay gargaar maskaxeed oo degdeg ah?

Qaybta degdegga ah ee BUP waxay qaabbilaan carruurta iyo dhalinyarada da'doodu ka yar tahay 18 sano ee ku nool gobolka Stockholm ee u baahan gargaar maskaxeed oo degdeg ah fiifadadkii, habeenkii iyo wakhtiyada fasaxyada. Si toos ah ayaad annaga noogu iman kartaa ama waxaa laguu tilmaami karaa mid ka mid ah meelaha qaabbilaadaha deegaanka/lookalka ah ama "En väg in". Waxa kale oo aanu leenahay adeega talo bixinta telefoonka oo aad wici karto si laguu siiyo caawimo xaaladaha degdega ah.

Lambarka telefoonka gargaarka degdegga ahi waa [08-123 669 00](tel:08-123 669 00), waxaadna soo wici kartaa halkaas saacad kasta. Ciwaanku waa Sachsgatan 10 på Södermalm i Stockholm.

Haddii aad markii horeba ahayd qof bukaan ah oo aanu ku ogayn oo aad u baahato gargaar maskaxeed oo degdeg ah inta maalintii lagu gudajiro,

wakhtiyada u dhexeeya saacadaha 8.00 iyo 16.00, waa inaad marka hore la xiriirtaa rugta qaabbilaada caafimaadka ee aad ka tirsanayd.